# Gaynta Adeegyada

Waxa uu bixiyaa hirgelinta adeegga bille ah iyo kormeerka qalabka tignoolajiyada iyo shakhsiyaadka marka loo baahdo.

Bixiyaha adeegga taageerada aragtida fog waxa uu siin doonaa waxbarasho iyo tababar ka caawinaya qofka isticmaalka qalabka tignoolajiyada, iyo sidoo kale tababar loogu talagalay xubnaha qoyska qofka, ilaaliyaha, shaqaalaha, ama dadka kale ee bixiya taageero dabiici ah ama adeegyo taageero oo la qaatay (lacag lagu bixiyo)

**Adeegyada Taageerada Aragtida Fog waxa laga heli karaa Waiver-yada Adeegyada Guriga iyo Bulshada ee soo socda:**

- Kharash ka-dhaafida taageerada qoysaska (FSW)
- Kharash ka-dhaafida loogu talagalay dadka waaweyn ee qaba naafo horumarineed, maalinta adeegyada
- Ogolaanshaha Dhameystiran ee Naafonimada Koritaanka (CDD)



Macluumaadka Adeegga Taageerada Aragtida Fog waxa lagu qeexay Xeerarka Maamulka Nebraska

*Cinwaanka 403 NAC Cutubyada 4, 5, iyo 6*


**Wixii macluumaad dheeraad ah booqo:**
https://dhhs.ne.gov/

Waaxda Caafimaadka iyo Adeegyada Aadanaha ee Nebraska

Waaxda Naafanimada iyo Horumarka Maskaxeed

NEBRASKA
Good Life. Great Mission.
DEPT. OF HEALTH AND HUMAN SERVICES

# Adeegga Taageerada Aragtida fog



DD-PAM-11 7/2025

***Caawinta dadka inay ku noolaadaan nolol wanaagsan***

# Qeexitaanka

Taageerada Aragtida Fog waa adeeg adeegsada tignoolajiyada si uu u bixiyo gargaar waqti-dhab ah, kormeer, iyo isgaarsiin iyadoo aan loo baahnayn shaqaale joogto ah oo goobta ku sugan. Taageerada aragtida Fog waxa lagu bixiyaa guriga gaarka ah ee ka-qaybgalaha iyo bulshada dhexdeeda, balse laguma bixiyo goob uu leeyahay, kireystay, maamulo, ama lagu xakameeyo bixiyaha adeegga. Waxay u saamaxdaa shakhsiyaadka inay ilaashadaan madaxbannaanidooda, iyagoo weli xiriir la yeelan kara xirfadlayaasha taageerada marka loo baahdo.

Taageerada Aragtida Fog laguma isticmaalo kormeer joogto ah oo shakhsi ah.

## Yaa kafaaidaysan kara

- Shakhsiyaadka u wareegaya nolol madaxbannaan
- Kuwa doonaya asturnaan dheeraad ah iyagoo weli helaya taageero.
- Qoysasku u raadinayaan kaalmo dheeraad ah kuwa ay jecel yihiin



## Faaidooyinka ay leedahay Taageerida Aragtida Fog

- **Madax banaanida oo kororta**
  - Shakhsiyaadka waxay u noolaan karaan si madax-bannaan iyaga oo hubinaya in caawimaadda la heli karo marka loo baahdo
- **Badbaadada iyo Ammaanka La Xoojiyey**
  - Tignoolajiyadu waxay xaqiijisaa in si degdeg ah loogu falceliyo xaaladaha degdegga ah ama khataraha suuragalka ah
- **Kharash wax ku ool ah**
  - Waxay yaraysaa baahida shaqaale joogto ah oo 24/7 goobta ku sugan, iyadoo weli la ilaalinayo taageero tayo sare leh
- **Fududeyn iyo Dabacsanaan**
  - Adeegyada waa la waafajin karaa iyadoo lagu salaynayo baahiyaha isbeddelaya iyo heerarka madaxbannaanida
- **Deganaansho Maskaxeed iyo Kalsooni**
  - Shakhsiyaadka iyo kuwa ay jecel yihiin waxay dareemi karaan kalsooni iyaga oo og in taageeradu kaliyah ka dhowdahay hal taleefoon ay wacaan oo kaliyah

## Taageerada Aragtida Fog Waxay Ka Kooban Tahay

- **La-talin:** Shakhsiyaadku waa in uu qiimeeyo bixiyaha adeegga, iyadoo talo laga qaadanayo kooxda Qorshaha Daryeelka Shakhsiyeed (PCP). Tani waxay xaqiijin doontaa in la sameeyo doorasho xog-ogaal ah oo ku saabsan qalabka dabooli doona baahida shakhsiyeed.
- **Qalabka:** Nooca qalabka iyo halka la dhigi doono waxa uu ku xirnaan doonaa baahida iyo rabitaanka shakhsiyaadka iyo ilaaliyahooda (haddii ay khusayso)

## Xulashada Qalabka

**Qalabka loo adeegsado buuxinta shuruuddan waa inuu ka koobnaadaa hal ama in ka badan nidaamyada soo socda:**

- Nidaamka dareenka dhaqdhaqaaqa
- Garashada firiquwensiga raadiyaha
- Muuqaal Toos ah oo Markaa ah
- Cod Toos ah oo Markaa ah
- GPS raadraaca
- Nidaamka Kormeerka ee Ku Salaysan Shabakadda
- Qalab kale oo buuxiya shuruudaha wadaxariirka laba-geesoodka ah

## Sida ay U shaqayso

- **Wadaxariirka Laba-geesoodka ah:** Xidhiidhka muuqaalka ama codka ee adeeggu waxa uu u saamaxayaa shakhsiyaadka inay si toos ah ula falgalaan shaqaalaha taageerada
- **Digniinnada Badbaadada & Kormeerka:** Dareemayaasha iyo tignoolajiyada caqliga leh ayaa ogaataa haduu dhicitaan imaado, bixiyaa xusuusinnta daawayn, iyo hawlo kale oo lama huraan ah
- **Taageerada La Qorsheeyey & Taageerada Degdeg ah:** Gargaar ayaa la heli karaa waqtiyada la qorsheeyey ama marka loo baahdo baahiyo gaar ah
- **Qorshayaasha Daryeelka Shakhsiyeed:** Adeegyada waxa loo habeeyaa iyadoo lagu salaynayo yoolalka shakhsiyeed, doorbidyada, iyo jadwalka nololeed ee maalinlaha ah